METHOTREXATE

Waa maxay ujeeddooyinka buugyarahan?

Waxaa buugyarahan loo qoray si lagaaga caawiyo in aad wax dheeraad ah ka fahanto daawada methotrexate. Waxaa laguugu sheegaya waxa ay tahay, sida ay wax u tarto, sida loogu daaweeyo xaaladaha cudur ee haragga, iyo halka aad ka heli karto warbixin dheeraad ah oo ku saabsan.

Waa maxay daawada methotrexate sidee ayayna wax u tartaa?

Daawada methotrexate waa daawo naaqusta soo saarka unugyo cusub ee nidaamka difaaca ee jirka. Waxaa markii hore, qiyaas badan, loogu isticmaalay si loogu daaweeyo kansarka, laakiin waxaa la soo ogaaday in ay tahay daawayn waxtar u leh cudurrada haragga iyo kalagoysyada jirka marka lagu qaato qiyaas aad uga yar kuwa lagu daaweeyo kansarka. Daawada methotrexate waxay yarayn kartaa bararka waxaana sidaas loogu isticmaali karaa si loogu daaweeyo cudurrada dabadheeraad ah. Waxyaabaha kale ee ay tarto waxaa ka mid ah yaraynta shaqada nidaamka difaaca ee jirka (qalabka jirka difaaca), markaa si taxaddar leh ayaa marwalba loo isticmaalaa.

Waa maxay xaaladaha cudur ee haragga ee lagu daaweeyo daawada methotrexate?

Daawada methotrexate waxaa lagu daaweeyaa cudurka haragga ee meelo jirka ka mid ah oo qolof yeesha oo la yiraahdo psoriasis, cudurka xanuunka iyo bararka kalagoysyada ee ka yimaadda cudurka psoriasis la yiraahdo, iyo weliba dhibaatooyin harag oo noocyo kale ah sida: boogaha cuncunka ee waayeelka (pemphigoid), cudurka boogaha haragga ee difaaca jirka (pemphigus), cudurka bararka xididdada qaarkood (sarcoidosis), cudurka adkaysiga haragga (scleroderma), cudurka bararka haragga iyo xubnaha ka hooseeya (dermatomyositis) iyo cambaarta.

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fax: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Registered Charity No. 258474

Muddo intee leeg ayaan u baahan doonaa in aan qaato daawada methotrexate ka hor inta aanay wax tarin?

Daawada methotrexate islamarkaaba wax ma tarto. Waxay qaadan kartaa 3 ilaa 12 toddobaad ka hor inta aadan faaîido isku arag.

Goormee habboon in aan qaato daawada methotrexate?

Daawada methotrexate waxaa caadi ahaan kiniin ahaan lagu qaataa **HAL JEER TODDOBAADKII**, isla maalin siman toddobaad kaste. **Marnaba ma habboona in maalin kaste la qaato.** Kiniinnada waxaa lala qaataa cuntada waana in la wada liqo oo aanan la jajabin ama la calalin. Daawada methotrexate waxaa weliba hal jeer toddobaadkii lagu bixin karaa mudis - haragga hoostiis (irbad lagu mudo haragga hoostiisa, sida irbadaha daawada insulin ee cudurka macaanka ama sonkorowga loo qaato), ama muruqyada dhexdooda (barida ama bowdada).

Kiniinnada 2.5 mg ayaa ah kuwa sida ugu badan loogu talinayo in la isticmaalo, maxaa yeelay waxay taasi suurtogelinaysaa in la bedbeddelo qiyaasta. Ma aha in lagu qaldo kiniinnada 10 mg, kuwaasoo laga yaabo in ay u eeg yihiin. Waa in si taxaddar leh loo hubiyo in la qoray oo la bixiyey awoodda saxda ah. Waa in aad **marwalba** hubiso qiyaasta iyo awoodda **ka hor** inta aadan qaadan daawada methotrexate.

Haddii aad dhaafto daawada methotrexate maalinta aad caadi ahaan qaadato, waxaad qaadan kartaa maalinta ku xigta ama laba maalmood ka dib; hase yeeshee, haddii aad ka raagtay muddo ka badan saddex cisho, iska daa toddobaadkaas. Labadaas xaaladoodba, qiyaastaada xigta qaado isla maalintii caadiga ahayd toddobaadka xiga.

Waa maxay qiyaasta habboon in aan qaato?

Takhtarkaaga ayaa kaala talin doona qiyaasta, waana in uu ku siiyo qiyaas tijaabo ah (caadi ahaan 2.5 ilaa 5 mg) 1 toddobaad ka hor inta aadan bilaabin daawaynta joogto ah. Wixii khuseeya cudurka psoriasis ee daran, qiyaasta caadi ah waa 10 ilaa 25 mg (mararka qaar ilaa 30 mg) oo afka lagu qaato, hal jeer toddobaadkii. Waa in taas loogu toosiyo ficilcelinta aad ka bixiso daawaynta iyo dhibaatooyinka soo raaca. Bukaanleyda qaarkood waxaa daawada methotrexate lagu siiyaa mudis.

Waa maxay dhibaatooyinka suurogal ah in ay soo raacaan daawada methotrexate?

Bukaanleyda qaarkood daawada methotrexate waxay u keeni kartaa yaqyaqsi, shuban ama boogaha afka. Daadashada timaha iyo firiirica ayaa aad ugu yar qiyaasta yar ee daawada methotrexate ee lagu daaweeyo cudurka psoriasis. Marka la qaato daawada methotrexate waxay taasi saamayn kartaa caddadka dhiigga (waxaa saamaynteeda ka mid ah in ay yaraadaan unugyada dhiigga ee soo baxa) waxaana sidaas ku sii suurogal badan in aad bukaansho jeermis qaaddo.

Waa in aad takhtarkaaga u tagto haddii:

- Aad yeelato cune xanuun ama bukaansho jeermis oo kale
- Aad xummad leedahay
- Aad yeelato boog ama dhiig aadan garanayn
- Aad isku aragto calaamado cusub ka dib marka aad bilowdo daawada methotrexate

Fiitamiinta folik asid la yiraahdo ayaa badi lagu taliyaa in laga dhigto fiitamin lagu darsado cuntada oo yarayn karta dhibaatooyinka soo raaca. Caadadu way kaladuwan tahay, waxaana muhiim ah in aad raacdo talada takhtarkaaga.

Haddii aadan hore u yeelan busbus, laakiin aad taabato qof leh busbus ama cadho, ama haddii aad yeelato busbus ama isnadaamis muddada aad qaadanayso daawada methotrexate, waa in aad **islamarkaaba** u tagto taktharkaaga maxaa yeelay waxaad u baahan kartaa daawayn gaar ah.

Ma jiraan dhibaatooyin kaloo soo raaca haddii daawada methotrexate la qaato muddo badan?

Marar dhif ah waxay daawada methotrexate keentaa bararka sanbabbada iyadoo neefta la tuuro. Haddii aad neeftuur yeelato, waa in aad **islamarkaaba** u tagto taktharkaaga.

Daawada methotrexate marka muddo badan la qaato waxay keeni kartaa halista cudurka beerka ee sirrhosis la yiraahdo, gaar ahaan haddii ay jiraan arrimo kale sida khamri la cabbo.

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fax: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Registered Charity No. 258474

Sidee la iigala socon doonaa dhibaatooyinka soo raaca daawaynta loo adeegsado daawada methotrexate?

Maadaama ay daawada methotrexate saamayn karto caddadka dhiigga, oo ay mararka qaar dhibaatooyin u keento beerka, waxuu takhtarkaagu qaban qaabin doonaa in si joogto ah dhiiggaaga loo baaro muddada aad daawadaas qaadanayso. **Waa in aadan** qaadan daawada methotrexate haddii aanan lagaa qaadin baaristaas dhiigga ee joogto ah. Waxaa iyaga lagaa qaadayaa toddobaad kaste marka qiyaasta daawada la beddelayo, iyo si aan ka yarayn 2dii ilaa 3dii biloodba mar marka qiyaasta daawada aanan la beddelin.

Calaamadaha bukaanshaha jeermis sida cune xanuun, boog afka lagu yeesho, shuban iyo dhibaatada laga dareemo iftiinka cadceedda, ayaa tilmaami kara in daawada methotrexate ay xad dhaaf tahay. Calaamadahaas waa in aad islamarkaaba ka warbixiso oo la baaro.

Saamaynta daawada methotrexate ay ku leedahay beerka ayaa lagu eegaa baaritaas dhiigga, waxaana mararka qaar (si kaladuwan) loo baahdaan in weliba qayb yar laga jaro beerka si saamayntaas loola socdo.

Diiwaanka Hawlaha Cilmiga nafleyda ee BAD (BADBIR)

Haddii laguu qoray daawada methotrexate si cudurkaaga psoriasis loogu daaweeyo, waxaa lagu weydiin karaa in aad ka qayb qaadato diiwaanka cilmiga nafleyda ee qaran. Diiwaankaas waxaa lagu barbar dhigaa badbaadada noocyada kaladuwan ee daawaynta cudurka psoriasis waxaana lagu eegaa sida ay wax u taraan. Waxaa loo aasaasay si loola socdo qaar ka mid ah noocyada daawaynta cusub ee cudurka psoriasis oo loo yaqaanno noocyada daawaynta ee cilmiga nafleyda. Diiwaanku waxuu takhaatiirta ugu deeqi doonaa warbixin ku saabsan sida ugu fiican in ay u isticmaalaan noocyada daawaynta ee u diyaar ah cudurka psoriasis ee meeldhexaad ah ilaa daran. Macluumaad diiwaanka looma gudbin doono adigoon si aad u og tahay u oggolaan.

Ma la i tallaali karaa muddada aan qaadanayo daawada methotrexate?

Waxaa lagu talinayaa in aadan isku tallaalin mid ka mid ah tallaallada ómoolô sida cudurka dabaysha, jadeecada Jarmalka iyo indha-caseeyaha. Waxaa la bixin karaa tallaalka cudurka dabaysha ee óaanan daarnaynôhalkii laga bixin lahaa mid ómoolôwaana in nooca óaanan daarnaynôweliba la siiyo dadka adiga kuu soo dhawaada, sida xubnaha reerkaaga.

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fax: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Registered Charity No. 258474

Haddii aad qaadato daawada methotrexate waa in aad ka fogaato taabashada carruurta la siiyey tallaalka cudurka dabaysha ee ónoolô muddo 4 ilaa 6 toddobaad ka dib tallaalka. Waxaa nabad ah oo lagu talinayaa tallaallada ifilada ee sanadkii la bixiyo iyo Pneumovax (fiiri buugyaraha bukaanleyda ee ku saabsan Tallaallada).

Daawada methotrexate miyay saamaysaa bacrinsanaanta ama uurka?

Daawada methotrexate waxay yarayn kartaa bacrinsanaanta ama kartida dhalidda carruurta waxaana la filanayaa in ay waxyeellayso ilmaha uurka ku jira, markaa **waa in aanan** la qaadan muddada uurka. Muddada la qaato daawada methotrexate, iyo ugu yaraan 3 bilood, oo laga jecel yahay 6 bilood, ka dib marka la joojiyo daawada methotrexate, haweenka iyo ragguba waa in ay qaadaan tallaabooyinka ka hortagga uurka.

Haddii aad ku talajirto in aad qoys yeelato, ama aad uur yeelato muddada aad qaadato daawada methotrexate, waa in aad taas takhtarkaaga kala hadasho islamarka suurogal ah. Waa in aadan ilme naasnuujin haddii aad qaadato daawada methotrexate.

Miyaan khamri cabbi karaa muddada aan qaato daawada methotrexate?

Khamrigu waxuu la falgalaa daawada methotrexate. Khamriga iyo daawada methotrexate waxay labadooduba waxyeellayn karaan beerka, markaa waxaa lagu talinayaa in aad sida ugu suurogal ah u yarayso khamriga.

Miyaan daawooyin kale qaadan karaa isla waqtiga aan qaato daawada methotrexate?

Daawooyinka qaarkood ayaa la falgala daawada methotrexate, markaa waa in aad marwalba taktharka ku daawaynaya u sheegto haddii aad qaadato daawada methotrexate. Waxaa loo baahan yahay in taxaddar gaar ah laga muujiyo daawooyinka aan steroid ahayn ee bararka ka hortaga sida asbiriinta iyo ibuprofen. Waa in aad qaadato daawooyinka ka hortaga bararka haddii uu taktharkaagu kuu qoro uun. Ha qaadan daawooyinka ódukaanka caadi looga soo iibsadoô adigoon horta kala hadlin taktharkaaga, kalkaaliyahaaga caafimaadka ama farmashiistahaaga. Waa in aad weliba ka fogaato daawooyinka antibiyootigga ee ay ku jirto daawada trimethoprim.

Halkeen ka heli karaa war dheeraad ah oo ku saabsan daawada methotrexate?

Haddii aad rabto in aad war dheeraad ah ka hesho daawada methotrexate, ama haddii aad ka walwal qabto daawayntaada, waa in aad la hadasho takhtarkaaga ama farmashiistahaaga. Xaashidan warbixinta kuma taxna dhammaan dhibaatooyinka soo raaca daawada methotrexate. Si aad faahfaahin ka sii dhammaystiran u hesho, fiiri xaashida warbixinta ee daawooyinka ee la soo dhexgeliyo rijeetadaada loogu talagalay daawada methotrexate.

Isku xireyaasha internetka ee lagu helo buugyareyaasha faahfaahsan:

www.dermnetnz.org/treatments/methotrexate.html

Waxay ujeeddada buugyarahan tahay in aad ka hesho warbixin sax ah oo ku saabsan mawduuca waxaana la isugu keenay fikradaha ay qabaan wakiillada Ururka Xirfadleyaasha haragga ee Ingiriiska: hase yeeshee, waxa ku jira ayaa laga yaabaa in uu mararka qaar ka duwan yahay talobixinta aad ka hesho takhtarkaaga.

Buugyarahan (oo af Ingiriisi ah) waxaa kartida akhriska u qiimeeyey Golaha Dib u eegidda Aan xirfad lahayn ee Warbixinta Bukaanleyda ee Ururka Xirfadleyaasha haragga ee Ingiriiska

URURKA XIRFADLEYAASHA HARAGGA EE INGIRIISKA
BUUGYARAHA WARBIXINTA BUKAANLEYDA
LA SOO SAARAY AUGUST 2004
LA CUSBOONAYSIIYEY ABRIIL 2010

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fax: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Registered Charity No. 258474